

Ogaysiiska ka Saarista

Taariikhda:

Waalidda qaaliga ahow:

Ogaysiiska ku lifaaqan wuxuu muujinayaa in ilmahaagu uusan hadda u hoggaansamin Sharciga Tallaalka Ardayga ee Wisconsin sidaas darteedna laga saari doono dugsigan

Si uu cunuggaadu u sii joogo iskuulka ama dib ugu noqdo iskuulka ka dib marka laga saaray, waa inaad sameysaa mid ka mid ah waxyaabaha soo socda:

- (1) Sii dugsigan taariikhda (bisha, maalinta, iyo sanadka) tallaalka ama tallaalada loo baahan yahay, oo laga helo diiwaanka caafimaadka ee ilmahaaga ama [diiwaanka tallaalka ee Wisconsin](#). Ka-reebista tallaalka varicella (chickenpox) waxaa loo oggolaan doonaa oo keliya haddii dhakhtar, kaaliyaha dhakhtarka, ama kalkaalisada caafimaad ee ugu sareysa ay diiwaan-geliyaan taariikhda la isku halleyn karo ee cudurka varicella iyagoo tilmaamaya in ardayga uu qabay varicella oo uu saxiixay Foomka Tallaalka Ardayga ([DHS Form 04020L](#)). Baadhitaanka shaybaarka ee difaaca jirka ayaa sidoo kale la aqbali karaa cudurradaas: jadeecada, qaamo-qashiirka, rubella, cagaarshowga B, iyo varicella.

AMA

- (2) Dalbo ka-dhaafid.

Isticmaal Diiwaanka Tallaalka Ardayga ee kugu lifaaqan si aad u bixiso macluumaadka kor lagu sharaxay.

Sharciga tallaalka ee gobolka Wisconsin waxaa loo dejiyay si looga ilaaliyo dhamaan caruurta cudurada lagaga hortagi karo tallaalka. Sharciga wuxuu u baahan yahay dugsiyada dadweynaha ee degmooyinka dugsiyada oo leh wax ka yar heerka u hoggaansanaanta 99% si looga saaro ardayda aan u hoggaansaneyn xanaanada ilaa fasalka shanaad. Sharcigu wuxuu sidoo kale khuseeyaa dugsiyada gaarka loo leeyahay. Dugsiyada gaarka loo leeyahay ee ka yar 99% heerka u hoggaansanaanta waxaa looga baahan yahay inay ka saaraan ardayda aan u hoggaansaneyn xanaanada ilaa fasalka shanaad. Ardayga aan u hoggaansamin waa midka "ka dambeeya jadwalka" ee tallaalka loo baahan yahay, ama aan lahayn diiwaan tallaalka oo ku jira faylka dugsiga oo aan lahayn faylka ka-dhaafitaan.

Waad ku mahadsantahay wadashaqeyntaada.